

Ballamaha iyo shuruucda anshaxa

Qolalka cuntada iyo hoolasha

Tusmada

Shuruudaha iyo
sharciyada

Maxaa galaya qolka
cuntada/hoolka

Siyaasadaha ballanta,
Joojinta iyo jabinta heshiiska

Shuruudaha iyo sharciyada

Dhismayaasha Deegaanka Uppsala waa u diyaar qofkasta. Haddii aad kiraysatay dhismayaasha deegaanka, waxaad masuul ka tahay ballamahan iyo shuruucdan anshaxa ee soo socda oo ku dhaqan qiyamka wanaagsan ee deegaanka Uppsala sida sinaanta, kaladuwanaanshaha iyo cadaalada. Si aad uga qeyb qaadatid dhammaan sharciga iyo qawaaniinta dhismayaasha kale, waxa laga akhrin karaa Iswidhish ahaan wabsaaydka deegaanka [boknings--och-ordningsregler-2020.pdf \(uppsala.se\)](https://www.uppsala.se/boknings--och-ordningsregler-2020.pdf)

Maxaa galaya qolka cuntada/hoolka?

Adiga kiraysanayaa waa inaad tahay ugu yaraan 18 sano jir da'da. Adiga kiraysanayaa waa inaad ka masuul tahay dhismayaasha. Markaad timaadid dhismayaasha iyo markaad ka tagaysid, waxaad masuul ka tahay baadhista dhismayaasha si waxkasta u nidaamsanaado. Ogeysii bokning@uppsala.se haddii wax qaldan ka dhacaan dhismayaasha. Fadlan ku lifaaq sawir. Haddii kale, waxaad masuul ka noqon doontaa qaladka qof kale.

Dhismayaasha dhexdooda waxa jira jadwalo nadiifin iyo maabka qalabka qurxinta. Haddii aad dib u habaysid qalabka quruxinta dhismayaasha, waa inaad dib iskugu habaysaa sida maabka ka muuqata. Dhismayaashu waa inay noqdaan nadiif iyo qaar nidaamsan markaad ka tagaysid. Albaabada iyo daaqaadaha waa in la xidhaa.

Adiga kiraysanaya waxaad ka masuul tahay nadiifinta dheeriga ah ee dhammaan oogooyinka la isticmaalay. Haddii aanad nadiifin ama raacin shuruucda, waxa lagaa qaadi doonaa lacag dhan SEK 500 oo kharashka nidaaminta dhismaha ah.

Nadiifinta dheeriga ah macnheedu waa in:

- Caagadaha lagu rido weelka qashinka.
- Dhulka waa in la nadiifiyaa. Tusaale ahaan, jayga, soodhaha, barafka, waraaqaha waa in la xaadho/laga xaadho.
- Kuraasta iyo miisaska waa in la masaxaa oo dib la iskugu habeeyaa sida maabku dhigaayo.
- Waxkasta oo aad soo qaadatay, waa in laga saaro dhismayaasha. Tusaale ahaan, cuntada, biibilayaasha, qalabka, xashiishka iyo hanbada.

Waxa macquula in aan lagu ogolaan tani dhismayaasha dhexdooda bilaa fasax gaara:

- Alkahoosha lama ogola.
- Ha usoo qaadan musbaarada iyo biraha dhismayaasha.
- Caruura looma ogola inay kali ku noqdaan dhismayaasha iyadoonu la joogin qof weyn oo masuula.
- Waxa macquula in aanad isticmaalin kijada iyo qalabka kijada ee dhismayaasha.
- Haku ciyaarin kubada sida kubada cagta dhismayaasha.
- Haku karin cunto dhismayaasha, kaliya ku cun cunto diyaarsan.
- Haku wareejin dhismayaasha kuu ballansan qofkale.
- Haku dhajin xayeysiisyo ama waraaqo.
- Dhismayaasha Fyrishov, waxa macquula in aanad usoo qaadan karin cunto iyo cabitaan.

Cunto karinta iyo daroogooyinka lama gola.

Waxaad masuul ka tahay raacida qawaaniinta badqabka dabka, in aan albaabadadaasi xaaladaha degdega la xidhin oo aan dad ka badan inta la ogol yahay aanay ku jirin dhismayaasha.

Kadib 22.00 Axada-Khumiista iyo kadib 23.00 Jimcaha-Sabtida waa inuu deganaadaa oo nafis ahaadaa.

Ballanta, joojinta iyo jabinta heshiiska

Si aad u joojisid bilaa lacag, waa inaad sameysaa ugu yaraan shan cisho ka hor. Haddii aad u baahan tahay inaad joojisid ka hor shan cisho ballantaada, waa inaad iimayl u dirtaa bokning@uppsala.se. Haddii aad ku joojisid wax ka yar shan cisho ka hor, waa inaad bixisaa lacagta. Haddii aanad joojin ballantaada, ganaac lacageed oo dhan SEK 1,000 ayaa lagaa qaadayaa maalmaha shaqada todobaadka iyo SEK 1,500 maalmaha fasaxa todobaadka.

Markay dhacdo in la jabiyo heshiiska, deegaanku wuxuu go'aansan karaa in ballantaada si degdega loo joojiyo. Markay dhacaan saddexdan xaaladood, waa lagaa joojinayaa oo ballamahaaga mustaqbalka ayaa meesha laga saari doonaa.